

5 XAQIIQO OO KU SAABSAN OPIOID OO QOF KASTA OO QAANGAAR AH AY TAHAY INUU OGAADO.

Ka ahaan waalid, daryeele, ama bare, waxaad cilmi nolosha badbaadiya u gudbin kartaa jiilka soo socdo. Waxaa halkan ku yaalla shan xaqiiqo oo ku saabsan opioid-yada, iska tan badinta, iyo soo kabasho aad dadka la wadaagto.

1. OPIOID-YADA WAA KUWO SI AAD AH LOOLA QABATIMO

Dhammaan opioid-yada, xitaa xanuun baabi'yaasha la isu qoro sida oxycodone, waxay keeni karaan ku tiirsanaan. Gaar ahaan dhalinyarada ay weli maskaxdooda korayso, waxaa si degdeg ah ugu dhici kara cillada laga qaado isticmaalka opioid-ka.

2. OGOW CALAAMADHA ISKA TAN-BADINTA

Iska tan-badinta waxay u dhici kartaa si degdeg ah, waana inaad uga falcelisaa si degdeg ah. Waxaa halkan ku yaalla hage degdeg ah oo ku saabsan sida lagu garto calaamadaha.



Wajigu waa mid midab aad barax u ah leh iyo/ama qoyan.



Cidiyaha faraha ama bishimaha waxay leeyihiin midab buluug ama basali ah.



Qofku tabar ma leh mana awoodo inuu soo kaco ama soo jeedo.



Qofku waa uu matagayaa, waxbaa ku taagan, ama cod xabeeb leh ayuu soosaarayaa.



Neefsashada iyo/ama garaaca wadnaha ayaa hooseeya ama istaagay.



Qaybta madow ee isha oo aad u yaraata.

3. FENTANYL AYAA BEDDESHAY WAX KASTA

Fentanyl waxay 50 jeer ka awood badan tahay heroin, xitaa qadarka ugu yar ayaa horseedi kara iska tan-badin iyo dhimasho. Waxaa badanaa loo isticmaalaa in laga sameeyo kaniino been ah balse sidoo kale waxaa laga heli karaa daroogo badan oo waddooyinka lagu iibiyo. Taasi waxay ka dhigaysaa qaadashada kaniino uusan qorin dhakhtar iyo tijaabinta walxo mid aad u khatar ah.

4. NALOXONE NOLOSHA AYAY BADBAADISAA

Naloxone (NARCAN®) waa daawo jirka ka saarta iska tan-badinta opioid waxayna badbaadisaa nolosha. Waa mid badbaado ah, ay fududahay in la isticmaalo, isla markaana la oggol yahay in lagu sito Minnesota. Naloxone waa mid si ballaaran loo heli karo lana awoodi karo, marka ma jirto marmarsiyo inaad marwalba wadan waydo.



KA HEL NARCAN® AGTAADA

5. KASOO KABASHADU WAA SUURAGAL

Cillada laga qaado isticmaalka maandooriyaha iyo opioid (OUD) waa la daaweyn karaa. Soo kabashada waa ay ku kala duwan tahay qofba qofka kale, waxaana jira barnaamijyo badan oo loogu talagalay oo ku salaysan da'da, qowmiyadda, ama aqoonsiga jinsiga.



SOO EEG KHEYRAADKEENA SI AAD UGA HESHO CAAWIMO IYO WAXYAALO KALE